

# 1 (Hal) milyan oo reer Alberta ah ayaa helay lacagta awood u helida qarash bixinta

Feebraayo 09, 2023 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

In ka badan hal milyan oo reer Alberta ah ayaa isdiiwaangeliyay oo loo qorsheeyay inay helaan lixdooda boqol doolar ee ugu horreysa ee ah qarash bixinta la awoodi karo, taasoo ka dhigantahay \$96 milyan oo ah gargaarka sicirbararka.

Dhaqaalaha Alberta si xooggan ayuu u soo kabsaday, laakiin dadka reer Alberta ayaa la kulmaya caqabado sidii ay u kululayn lahaayeen guryahooda oo ay u quudin lahaayeen qoysaskooda. Qorshaha Waxqabadka Qarash Bixinta la Awoodi Karo ee Alberta (Alberta's Affordability Action Plan) wuxuu caawinayaa in Alberta noqoto meel nolosheeshda la awoodi karo.

Nidaam Khadka tooska (online) oo arji ah ayaa loo qaabeeeyey iyadoo la adeegsanayo khibradda guriga iyo agabka si habsami leh loogu habeeyo lacagaha lalacagta awoodida qarash bixinta si loo siiyo qoysaska, waayeelka iyo kuwa aadka u nugul ee kaalmada ay u baahan yihii wakhtiga ku habboon. Lacagaha la awoodi karo ayaa ah kaliya mid ka mid ah talaabooyinka lagu dhawaaqay bishii Nofembar kuwaas oo hadda socda si dadka reer Alberta looga caawiyo inay ka gudbaan dhibaatadan awoodi darida.

"Aad ayaaan ugu hanweynahay shaqaalaha dadweynaha ee Alberta kuwaas oo soo saaray khariidad lacag bixeend oo nooceedii ugu horreeyay ah muddo ka yar laba bilood iyada oo aan wax kharash ah lagu kordhin cashuur bixiyeyaasha. Tani waxay caddayn dheeraad ah u tahay in tiknaloojiyada iyo hal abuurnimada aan ku

casriyeyn karno geeddi socodkeenna, bixinno xalal tayo sare leh iyo aalado adeegsigeeda uu fududyahay oo badan kuwaas oo u keeni doona qiimo iyo natiijooyin wanaagsan dadka reer Alberta.

*Nate Glubish, Wasiirka Tiknaloojiyada iyo Hal abuurka*

"Tani waa guul aad u weyn oo ku aaddan dadaalkayaga joogtada ah ee aan ku ilaalinayno nolosha Alberta oo ah mid la awoodi karo. Hal milyan oo carruur, waayeel iyo dadka reer Alberta ah oo ku jira barnaamijiyada taageerada aasaasiga ah ayaa hadda la diiwaan geliyay si ay u helaan lacag bixinno oo ah awood u helidda qarashka bishii si loo yareeyo cadaadiska sicir bararka ee adag. Dawladdeennu waxay diiradda saaraysaa awood siinta, waxaanan sii wadi doonaa sahaminta gargaar dheeri ah oo dadka reer Alberta ah."

*Matt Jones, Wasiirka Kartimaalka iyo Tamarta*

Hal milyan oo reer Alberta ka mid ah oo hadda lacag bixinadan helaya, 300,000 ayaa si toos ah loo diiwaangeliyey in ka badan 700,000 ayaa ka codsatay marinka. In ka badan 650,000 oo ka soo codsaday bogga khadka internetka ayaa helay lacag bixintoodii ugu horreysay, iyadoo inta soo hartay ay heli doonaan lacagtoodii ugu horreysay maalmaha soo socda.

\$600 ee lacag bixinta awood u helidda qarashka waxay ku kordhinaysaa boqollaal doollar ee dadka reer Alberta ay helayaan kuna kaydsanayaan Qorshaha Waxqabadka Qarash Bixinta la Awoodi Karo ee Alberta. Tan waxaa ku jira qiyaastii \$900 oo la badbaadiyay iyadoo la laalaynayo canshuurta shidaalka ee gobolka, ballaarinta dhimista korontada, kordhinta lacagaha faa'iidooyinka ee barnaamijiyada taageerada aasaasiga ah iyo joojinta heerka ko u qaadista qiimaha caymiska gaadiidka gaarka loo leeyahay illaa dhammaadka 2023.

Taageerooyinkan ka sokow, dawladda Alberta waxay siisay taageero maaliyadeed oo dheeraad ah bangiyada cuntada iyo kooxaha kale ee bulshada, kordhinta maalgelinta barnaamijiyada tikidhada bas raaca ee dadka dakhligoodu hooseeyo iyo cashuurta dakhliga shakhsi ahaaneed ee la tilmaamay.

Waxa mahad leh go'aan qaadashada miyirka leh iyo firfircoonda iyo dhaqaalaha kobcaya ee Alberta, gobolku waxa uu ku jira xaalad maaliyadeed oo xoogan oo leh miisaaniyad dheeli tiran, taas oo u sahashay dawlada Alberta in ay bixiso gargaar si

dadka reer Alberta iyo qoysasku ay si fiican ugu maareeyaan dhibaatadan sicir bararka, iyo wixii ka baxsan.

## Xaqiiqda degdeg ah

- 24-kii saacadood ee ugu horreeyay ee furmay marinka, in ka badan 140,000 oo codsi ayaa si guul leh looga baaraandegay lacag bixinta, caawinta in ka badan 190,000 carruur ah iyo 65,000 oo waayeel ah.
- Janaayo 31da, in ka badan 575,000 oo reer Alberta ayaa lacagihii ugu horeeyay ku helay deebaaji toos ah ama jeegag, iyagoo caawinaya in ka badan 400,000 waayeel iyo in ka badan 174,000 oo caruur ah.
- Dadka reer Alberta waxay wax badan ka baran karaan dhammaan barnaamijyada gargaarka la awoodi karo ee sal-ballaaran iyo kuwa la beegsaday ee khadka tooska ah.

### *Taageerida carruurta, waayeelka iyo Albertans nugul*

- Bisha Febraayo 8, 950,000 oo reer Alberta ah waxay heleen, heleen waalid ama mas'uul iyagoo ku hadlaya magacooda, ugu horrayn ilaa lix \$100 lacag bixin ah bishii.
  - Tan waxa ku jira 469,000 carruur ah, 380,000 waayeel ah iyo 118,000 ee reer Alberta ah oo nugul oo ku jira barnaamijyada taageerada asaasiga ah sida AISI, Taageerada dakhliga iyo barnaamijka Dadka Naafada Koriinka ah (PDD).
  - Ilaa hadda, dadka reer Alberta waxay heleen \$96 milyan doolar oo lacag bixin ah oo ah awood u helida qarash bixinta. Waxaa la qiyaasayaa in lixda bilood ee buuxa, wadar ahaan ilaa \$500 milyan ay socon doonto.
- Lacagaha waxaa lagu keenay deebaaji toos ah ama jeegag dhammaan ee dadka reer Alberta si guul leh isku diiwaan geliyay ka hor Jan. 27. Dadka reer Alberta oo isdiiwaangeliyey Jan. 27 waxay ku heli doonaan lacagahooda 10 maalmood gudahooda markay buuxiyaan codsigooda.
- Caawinta codsiyada dadka reer Alberta waxay awoodaan:
  - Ka wacaan khadka taageerada Koontada La Xaqiijiyay 1-844-643-2789.

- Ka wacaan Khadka Macluumaadka Qorshaha Waxqabadka Qarash Bixinta la Awoodi Karo ee Alberta 1-844-644-9955.
- Booqo wakiilka diiwaanka ama Xarunta Taageerada Alberta shaqsi ahaan si aad taageero uga hesho 50 goobood iyo in ka badan 100 luqadood lacag la'aan.

#### *Kaalmada sicir bararka ee dhammaan reer Alberta*

- Taageerada kale ee la awoodi karo ee bixinta gargaarka waxaa ka mid ah:
  - \$500 wadarta guud ee dhimista korontada.
  - Boqollaal doolar oo loogu talagalay darawallada oo lagu qiyaasay dhimista cashuurta shidaalka.
  - Tusmaynta boqolkiiba lix waxay kordhisaa barnaamijyada taageerada aasaasiga ah sida AISH, Taageerada dakhliga, dheefaha waayeelka iyo dheefaha ilmaha iyo qoyska Alberta.
  - Ilaalinta qiimaha gaaska dabiiciga ah iyo korontada.
  - Isbedelka cashuurta dakhliga ee shakhsii ahaaneed kaas oo kaa caawin doona in lacag badan lagu hayo jeebabka shakhsiyadka iyo qoysaska.
- Qaybo badan oo Alberta ah saddexda sano ee \$2.8-bilyan Qorshaha Waxqabadka Qarash Bixinta la Awoodi Karo ee Alberta ayaa sii wadi doona bixinta taageerada mustaqbalka dadka reer Alberta.
  - Kuwaas waxaa ka mid ah dhimista gaaska dabiiciga ah iyo dhimista canshuurta shidaalka, oo ku saleysan kiciyeyasha qiimaha, iyo tusmada nidaamka canshuurta Alberta iyo taageerada bulshada.
- Dawlada Alberta waxay sidoo kale kala xaajootay heshiis dawlada dhexe ah oo ku saabsan tillaabooyinka la awoodi karo ee daryeelka caruurta oo badbaadin doona waalidiinta inta u dhaxaysa \$450 iyo \$635 bishiiba canugiiba si buuxda u xanaanaynaya.

## Related information

- Is-qor ama hubi Heerka Koontadaada La Xaqiijiyay ([Sign-up or check your Verified Account Status](#))
- Codso lacagta awood u helida qarash bixinta ([Apply for Affordability Payments](#))

- Qarash Bixinta la Awoodi Karo ([Affordability Action Plan](#))

## Warbaahinta kala duwan

- Fiidiyow: Sida loo codsado lacagta awood u helida qarash bixinta ([Video: How to apply for your affordability payments](#))